

Nofeembar 22, 2016

Gacaliye Qoyska iyo Bulshada Dugsiga,

Waxaa nasiib aad u badan noo ah in aan leenahay bulsho kala duwan iyo arday ka kala timid lex qaarad, marka la soo qaado todobada qaarad, oo ku hadasha 100+ luqado iyo ku dhaqma diimo kala duwan. Dhowrkii todobaad ee la soo dhaafay, waxaa jiray dhowr falal oo ku dhisan naceeb oo ka dhacay waddanka Mareykanka, kana mid ah gobolkeno iyo dugsiga dagmadena.

Dugsiyadana waa meelo ammaan ah halkaas oo dhamaan ardayda, adeegyada, shaqaalaha, iyo xubnaha bulshada la xushmeeyo lana qiimeeyo. Marka aan wada hadal la galno ardayda iyo shaqaalaha, iyadoo aan la fiirinin fikradda siyaasadda, waa in aan waqtiga u isticmaalno in aan ku dhiso jawi ku habboon taageero iyo ka-qeybgelin kuna dhisan fakar muhiim ah iyo hadalka waxbarashada ee waxbara ardaydena.

Inta aan ku sii socono sannad dugsiyeedka, horumarino heerka sare iyo sinaanta ka jirta bulshadana dugsiga, fadlan xasuuso xilka aan iska saarnay madaniga iyo wada hadalka wanaagsan. Waa in aan muujiyo karti iyo in aan xoojino naftena iyo ardaydena inta aan sii wadno shaqada muhiimka ah aan la qabano caruurtena. In la ilaaliyo ammaanka ardayda waa mudnaantena kowaad.

Waa waqtigaan marka aan u baahanahay in aan dhiiri gelino hiddaha hadalka wanaagsan iyo la socono dabecadana inta aan ku sii socono in aan ardaydena iyo asxaabta u muujino taageero, naxariis iyo calool jileec. Iyadoo aan la fiirinin wararka ku dhisan naceebka iyo fikradaha siyaasadda qofka, waxaan dhamaan ku heshiin karnaa in waxyaabahaan aysan boos ka helin fasaladena. Waxaan halkaan u joognaa in aan kobcino, taageero iyo in aan boos ammaan ah siino dhamaan ardayda, shaqaalaha iyo xubnaha bulshada.

Fadlan xasuuso in aan u dulqaadan doonin falalka takoorka ee lala kulmo. Dhamaan cabbashooyinka waxaan wax uga qaban doonaa sida ku habboon. Iminka waxaan qabnoo dhowr siyaasado oo ku saabsan:

- hawlaha siyaasadda ee laga fulliyo hantida dagmada (<http://www.slcschools.org/policies/documents/G-17-Policy.pdf>)
- takooka, kadeedka, aar gudashada (<http://www.slcschools.org/policies/documents/G-19-Policy.pdf>)
- Gardareysiga internetka iyo jujuubka (<http://www.slcschools.org/policies/documents/G-20-AP.pdf>)

Fadlan la xariir xafiisyada soo socda haddii aad qabtid su'aalo:

- Sinaanta Waaxda (Equity Department): Claustina Mahon-Reynolds (801) 578-8281
- Waaxda Adeegyada Ardayga (Student Services Department): Mindi Holmdahl (801) 578-8202
- Waaxda Wada Shaqeynta Qoyska iyo Dugsiga (Family and School Collaboration Department): Jenny Mayer-Glenn (801) 578-8283

**Fadlan hoos ka fiiri meelaha lagala xariiro ilaha si aad u heshid taageerada la siiyo qoysaska:**

<b>Magaca</b>	<b>Telefoonka</b>	<b>Xariirka</b>	<b>Faalada</b>
Comunidades Unidas	(801) 487-4143	<a href="http://www.cuutah.org/">http://www.cuutah.org/</a>	Tababar iyo macluumaadka la siiyo waalidiinta
Adeegyada Sadaqada Katooligga (Catholic Charity Services)	(801) 977-9119	<a href="http://www.ccsutah.org/">http://www.ccsutah.org/</a>	Tababarada
Xarunta Bulshada Yahuudda (Jewish Community Center)	(801) 581-0098	<a href="#">JCC</a>	Meel furan oo ammaan u ah dhamaan diimaha

**Taageero,**

**Claustina Mahon-Reynolds**  
**Director of Equity**  
**(Agaasimaha Sinaanta)**